10 QAAB

ONLINE KA LACAG

KAGA SAMEEY

IS BADAL SAMEEY SANADKA CUSU
EE 2025 MASKAX AHAAN IYO DAQLI
AHAAN.



WRITTEN BY

ADAM MOHAMED



TAAJIR NOQO 2025

10KAAN QAAB

ONLINE KA LACAG KAGA SAMEEY

BY ADAM MOHAMED HUSSEIN

HORDHAC

Introduction

Dunida maanta, internetka wuxuu noqday mid ka mid ah ilaha ugu muhiimsan ee lacag laga sameeyo. Waxaa jira boqolaal fursadood oo qof walba oo xirfad ama xiiso gaar ah leh uu ka faa'iidi karo. Waxa ugu wanaagsan ayaa ah inaad u baahan tahay kaliya waqti, dadaal, iyo go'aan adag si aad u bilowdo safarkaaga lacag-sameynta onlineka.

Buuggan waxaan kuugu soo bandhigayaa 10 qaab oo aad lacag uga sameyn karto internetka. Hababkaasi waxay daboolayaan xirfado badan, laga bilaabo kuwa u baahan aqoon gaar ah sida naqshadeynta iyo barnaamij-sameynta ilaa kuwa fudud sida gadashada alaab ama qoraalka. Ujeeddada buuggani waa inuu ku siiyo waddooyin cad oo aad ku bilaabi karto ganacsi online ah, isla markaana aad si tartiib ah u kobciso dakhligaaga.

1. FREELANCING (SHAQOOYIN GAAR AH OO ONLINE AH)



MAXEEY TAHAY

Freelancing waa in aad dadka u qabato shaqooyin gaar ah, sida qoraalka, naqshadeynta (design), turjumaada, ama barnaamijyada.

SIDA LOO BILAAWO

Abuur akoon bogag freelancing ah sida Upwork, Fiverr, ama Freelancer.

Ku dar khibradaada iyo xirfadaha aad leedahay (tusaale: Graphic Design, Video Editing, ama qoraal).

Dalbo mashruucyo yar si aad ugu bilowdo inaad kalsooni kasbato.

2. E-COMMERCE (GADISTA ONLINE)



MAXEEY TAHAY

E-commerce waa inaad alaab ku iibiso internetka. Waxaad abuuri kartaa dukaankaaga online ah.

SIDA LOO BILAAWO

Isticmaal madallo sida Shopify, WooCommerce, ama Amazon.

Raadi alaab qiimo jaban ah oo aad iibiso (tusaale: alaabta dadku si fudud u isticmaalaan).

Samee suuq-geyn (marketing) si aad u kordhiso iibka.

3. AFFILIATE MARKETING (DHEXDHEXAADIN OO KOMISHAN KA HELID)



MAXEEY TAHAY

Affiliate marketing waa inaad kor u qaaddo badeecado iyo adeegyo shirkado kale oo aad komishan ka hesho iib kasta oo adiga kugu yimaada.

SIDA LOO BILAAWO

Abuur akoon bogag freelancing ah sida Upwork, Fiverr, ama Freelancer.

Ku dar khibradaada iyo xirfadaha aad leedahay (tusaale: Graphic Design, Video Editing, ama qoraal).

Dalbo mashruucyo yar si aad ugu bilowdo inaad kalsooni kasbato.

4. CONTENT CREATION (ABUURISTA MUUQAALKA IYO MAQAALADA)



MAXEEY TAHAY

Abuurista content waa inaad sameyso videos (YouTube), qoraallo (blogs), ama sawirro (TikTok/Instagram).

SIDA LOO BILAAWO

Ka bilow YouTube oo samee mowduucyo dadku xiiseeyaan.

Monetize ku samee channel-kaaga marka aad gaarto 1000 subscribers iyo 4000 saacadood oo la daawaday.

Sidoo kale, waxaad lacag ka heli kartaa ads iyo xayaysiisyada.

5. DROPSHIPPING (IIBINTA ALAABO AAN KEYD KUUGU JIRIN)



MAXEEY TAHAY

Dropshipping waa inaad iibiso alaab iyadoo aanad alaabta kaydsaneyn; shirkad kale ayaa keenaysa alaabta.

SIDA LOO BILAAWO

Samee dukaan Shopify ah.

Isku xir shirkadaha dropshipping sida Oberlo ama AliExpress.

Suuq-gee alaabta adigoo adeegsanaya Facebook Ads ama TikTok.

6. ONLINE TUTORING (CASHARRO ONLINE AH)



MAXEEY TAHAY

Haddii aad xirfad leedahay, tusaale ahaan barashada luuqadaha ama xirfado kale, waxaad bixin kartaa casharro online ah.

SIDA LOO BILAAWO

Ku biir barnaamijyada sida Preply, Italki, ama Chegg Tutors.

Samee jadwalkaaga shaqo oo gaar ah.

Bilow inaad ardayda ka caawiso aqoonta ay rabaan.

7. APP DEVELOPMENT (SAMEYNTA APPS)



MAXEEY TAHAY

Haddii aad leedahay xirfad dhinaca barnaamijyada mobile-ka, waxaad abuuri kartaa apps oo lacag ka sameyn kartaa.

SIDA LOO BILAAWO

Baro barnaamijyada sida Flutter, React Native, ama Android Studio.

Samee apps fudud oo aad ku qiimeyn karto Play Store ama App Store.

Heli lacagta adigoo ku xayaysiiyo apps-kaaga ama lacag ku dalbo.

8. STOCK PHOTOGRAPHY (SAWIRRO IIB AH)



MAXEEY TAHAY

Sawirradaada waxaad ku iibin kartaa internetka haddii aad tahay qof sawir-qaade ah.

SIDA LOO BILAAWO

Ku biir madallo sida Shutterstock, Adobe Stock, ama Getty Images.

Soo geli sawirro tayo fiican leh.

Markii sawirkaaga la iibsado, waxaad heleysaa lacagtaada

9. SOCIAL MEDIA MANAGEMENT (MAAREYNTA BARAHA BULSHADA)



MAXEEY TAHAY

Shirkado badan ayaa u baahan qof u maareeya akoonnada baraha bulshada, tusaale ahaan Instagram, Facebook, ama TikTok.

SIDA LOO BILAAWO

Ku xayeysiiso xirfadahaaga bogag freelancing ah ama soo bandhig adeegyadaada online.

Baro qalabka maareynta sida Hootsuite ama Buffer.

La shaqee shirkadaha yaryar si aad kalsooni u kasbato.

10. WRITING AND BLOGGING (QORISTA IYO BLOG-SAMEYNTA)



MAXEEY TAHAY

Blogging waa inaad furato website qoraallo gaar ahna ku daabacdo. Qorista waa inaad dadka u qorto maqaalada

SIDA LOO BILAAWO

Fur blog adoo adeegsanaya WordPress ama Blogger.

Qor mowduucyo dadka xiiso gelinaya (tusaale: caafimaadka, dalxiiska, ama Tiknoolajiyadda).

Lacag samee adigoo isticmaalaya Google AdSense iyo affiliate marketing.

GUNAANAD

DHAMAAD

Internetka waa albaab ballaaran oo fursado badan u furaya qof kasta oo doonaya inuu noloshiisa dhaqaale beddelo. Waxa kaliya ee lagaa doonayo waa inaad qaaddo tallaabada ugu horreysa, iyadoo aan la eegin heerkaaga aqoon ama xirfad. Hababka aan ku soo bandhignay buuggan waxay u dhigmaan jid cusub oo aad ku bilaabi karto safar aad ku gaarto xorriyadda maaliyadeed iyo horumar joogto ah.

Xasuusnow, guushu kama timaado hal habeen oo keliya – waxay u baahan tahay dulqaad, shaqo adag, iyo adkeysi. Marka aad si joogto ah u dadaasho, waxaad heli doontaa natiijooyin waaweyn oo wax ka beddelaya nolos